



Talo ka socota Guddiga Federaalka ee Maslaxada Dadweynaha

Masiibo Dhacday Marka Laga Baxo

Wax fudud ma aha in laga soo kabsado masiibo. Halkan ka akhriso talooyin kugu caawinaya in aad iska ilaaliso qalinshubato marka ay masiibo dhacdo ka dib, ilaalinta xogtaada shakhsiga ah, iyo sida aad dhaqaale ahaan u ceyman karto.

Sida Looga Feejignaado Qalinshubatada Wakhtiga Nadiifinta & Dayactirka

- **Ka digtoonow qof kasta oo kuu ballanqaadaya nadiifin iyo dayactirid degdeg ah.** Qaar baa sheegta kharash aan macquul ahayn, oo lacag horumaris ah ayey rabaan, ama shaqada aqoon uma laha.
- **Iska hubi qandaraasleyaasha.** Ka hor intaadan lacag siin, weydii aqoonsigooda, leysanka shaqada, iyo caddeynta ceymiskooda. Marna ha rumaysan wax ballanqaad ah oo aan qoraal ahayn.
- **Lacag ha ku bixin habka dadban, kaar hadiyad, habka lacagta qarsoon, ama lacag caddaan ah.** Weligaa ha bixin lacagta ugu dambaysa ilaa shaqada lagu dhammeeyo oo aad ku qanacdo.

Sida Lagu Garto Khiyaamada Qofka ah Qalinshubatada


- **Hay'adda masiibooyinka ee FEMA lacag kama qaadato codsadhaha.** Haddii uu qof ku weydiiyo lacag si aad xaq ugu yeelato lacagta FEMA, waa qalinshubato. Meesha ugu fiican ee xogta laga helo waa [FEMA.gov](https://www.fema.gov).
- **Macluumaadkaaga shakhsiga ah ilaalso.** Qalinshubatada oo keliya ayaa sheegata in ay yihiin shaqaale dawladeed oo ka dibna kaa raba lacag ama in aad siiso kaarkaaga amaahda, koontadaada bangiga, ama Sagaalkaaga Lambar.
- **Ogow calaamadaha khiyaamada ah marka guri lagaa kireynayo.** Haddii uu qof ku weydiiyo lacag ah horumaris ama kiro ka hor intaadan la kulmin ama saxiixin heshiiska kirada, qofkaasi waa qalinshubato. Ha rumeysan.

Sida Loo Dhowrto oo Loola Socdo Maalkaaga

Waxaa laga yaabaa in aad guriga ka soo cararto adiga oo aan haysan aqoonsi, jeegag, kaar bangi iyo kaararka amaahda, iyo dukumiintiyada kale. Waxaa laga yaabaa in aadan muddo arki karin koontadaada bangiga ama jeegga mushaarkaaga. Maxaa kuugu xiga?

Maareynta Lacagta

- **Kaararka kaa luma ee ah kan bangiga (ATM), kuwa amaahda sida ugu dhakhsaha badan ugu sheeg bangiyadii ku siiyey.**
- **La xiriir meesha aad ka shaqeyso.** Haddii ay meesha shaqadu xiran tahay, ama haddii aadan aadi karin, weydii haddii aad heli karto jeeggaaga iyo manaafacaadka.
- **Taleefan u dir maamulka degmada haddii aad ka hesho adeegyo ama kaalmo.** Taleefan u dir xafiiska Hawgabka Dadweynaha (Social Security) 1-800-772-1213 ama xafiiska Ciidanka Hawlgabay (Veterans Affairs) 1-800-827-1000.



Sumcaddaada Dhaqaalaha

- **Ka eego warbixinta sumcaddaada** barta [AnnualCreditReport.com](https://www.annualcreditreport.com). Sidaas ayaa ku ceyman kartaa haddii aadan haysan wax dukumiinti ama aqoonsi ah.
- **Sida degdeg ah ula hadal meelaha biilasha iyo lacagta, milkiilaha guriga, iyo shirkadda korontada.** Waxaa laga yaabaa inay kula shaqeeyaan si aadan daahid awgeed u bixin lacago dheeraad ah, in dib laguugu dhigo lacagta, inaan wax lagaala wareegin, iyo inaan guri amaah ah lagaa xaraashin.

Sida loo soo Beddesho wixii kaa Hallaaba ama Luma oo ah Dukumiinti

Halkan waxaa kuugu qoran meelaha aad la xiriireyso.

- **Dukumiintiga hantida guryaha ah:** Diiwaanka milkiileyaasha degmada
- **Rahmaadda:** Amaahbixiyaha ama shirkadda rahmaadda
- **Heshiisyada guryaha:** Milkiileyaasha ama shirkadda maareynta guryaha
- **Lahaanshaha baabuur/leysanka darawalka:** Xoghayaha Gobolka ama waaxda baabuurta
- **Shahaadada dhalashada:** Xafiiska dad-dhigidda ee deegaanka aad ku dhalatay
- **Kaarka Sagaalka Lambar:** Xafiiska Maamulka Hawlgabka Dadweynaha ee deegaanka

Wixii faahfaahin iyo talo ah, booqo ftc.gov/WeatherEmergencies

Tasiilaadka Deegaanka

Santuuqa hoose ku qoro hay'adaha gobolka ee aad la xiriireyso markay jiraan xaalado degdeg ah (eeg tusaale ah gobolka Florida). Dabadeedna daabaco oo koobbiga uu sii qeybi dadweynaha.